# Hannaanka loo marayo xulashada Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha Dawlad Goboleedka Hirshabeelle

**Habraac cad, Daah-furan, Dheelli-tiran iyo U-qalmid**

**Qaabka loo maareynayo xulashada Agaasimayaasha Guud**

## 1. Hordhac

Marka laga reebo magacaabista Golaha Wasiirrada, waxaa kaloo muhiimad baaxad weyn leh, xulashada Agaasimayaasha Guud (DGs) oo ah go'aan saameyn weyn ku leh howlaha iyo hoggaanka Dawlad Goboleedka Hirshabeelle, sababtoo ah, Agaasimayaasha Guud waa kuwa ugu sarreeya shaqaalaha Wasaaradaha, mas'uulna ka ah howl-maalmeedka iyo habsami-u-socodka howlaha Wasaaradaha. Waxaa ay udub dhexaad u yihiin hirgelinta hannaan maamul iyo dowlad wanaag. Sidoo kale, waxaa ay mas'uul ka yihiin hirgalinta iyo fulinta qorshaha Wasaaradaha, si loo gaaro natiijada iyo hadafka Wasaarad walba u deggan ama loo idmaday.

Iyadoo laga duulayo Wareegtada Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Hirshabeelle Tix. DGHSH/XMM/098/018 kuna saabanayd magacaabid guddi wasiirro ah oo ka kooban 9 (sagaal) xubnood loona xilsaaray inay si daah-furan, dheelli-tiran mudnaantana koowaadna la siiyey aqoonta, xirfadda iyo khibradda shaqo ay ku soo xulaan Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha Dawlad Goboleedka Hirshabeelle.

Hadaba, si loo dhiso wasaarado fuliyo himmilada, higsiga iyo qorshaha Dawladda Hirshabeelle, waxaa lama huraan ah in si daah-furan, fursad shaqo loo siiyo aqoonyahannada Hirshabeelle ee khibradda u leh hawlaha maamulka iyo dawlad wanaagga. Hanaankan lagu tartamayo, waxaa hoggaamin doona Guddiga wasiirrada ee hawshan u xilsaaran oo ay kaabayaan Guddoonka Guddiga Shaqaalaha Ra'yidka ee Dawlad Goboleedka Hirshabeelle.

Sidaa darteed, dhammaan Wasaaraduhu waxay yeelan doonaan Agaasimeyaal Guud; waxaana loo marayaa dhabbaha hoos ku tilmaaman:

## 2. Dhabbaha loo marayo

b. Wejiga koowaad waxaa lagu xaddidayaa 20ka Wasaaradood ee Hirshabeelle.

Soo bandhiggidda shaqaaleynta Agaasimayaasha Guud waxaa loo sameynayaa si wada-jir ah dhammantood.

t. Xoghayayaasha Joogtada ah iyo Agaasimayaasha Guud ee hadda jira waa inay u soo tartamaan jagooyinkooda haddii ay danaynayaan.

## 3. Hannaanka xulista

Hannaanka xulista shaqaalaysiinta wuxuu noqon doonaa mid ku salaysan:

b. aqoon
t. waaya-aragnimo
j.xirfad
x. karti iyo hufnaan iyo
kh. kalsoonida bulshada si loo helo dheelli-tir siyaasadeed

## 4. Nidaamka shaqaaleynta iyo sida lagu soo xulayo

Guddiga wasiirrada ah oo ka kooban 9 (sagaal) xubnood, iyo Guddoonka Guddiga Shaqaalaha Ra'yidka ah ee Hirshabeelle oo ka kooban 3 (saddex) xubnood oo kor joogtaynaya habraaca xulista & dheelli-tirka (oversight of selection process) ayaa wada jir ahaan hagi doona habraaca shaqaalaysiinta.

## 5. Habraaca Tartanka

i. Heerka koowaad: Soo gudbinta codsiga shaqo.

- Tartame walba waxaa kaliya oo loo ogolyahay in uu soo codsan karo ugu badnaan labo (2) wasaaradood
- Qoraalkan, waxaa lagu baahinayaa Jowhar.com iyo Hiiraan.com
- Araajida oo lagu soo diri doono emailka hoos ku qoran keliya, waxay bilaabmeysaa 10ka bisha April 2018
- Wakhtiga araajida wuxuu ku egtahay 24ta bisha April 2018 (24:00 PM) saqda dhexe.
- Arjiga (codiga) waxaa lagu soo buuxinayaa foomka (application form-ka halkan ku lifaaqan).
- Codsiga (arjiga) shaqo, CV-ga, waraaqaha aqoonsiga iyo waxbarashada la xiriira waxaa lagu soo gudbinayaa: hr.presidency.hirshabellestate@gmail.com
- Lama qaban doono arji iyo macluumaad khuseeya shaqadan, haddii lagu soo diro meel aan emailkan ahayn.

ii. Heerka Labaad: Qiimeynta iyo kala soocidda codsiyada ama araajida tartamayaasha

Waxaa bilaabanaya qiimeynta iyo kala soocidda tartamayaasha si loo soo saaro tartamayaasha u gudbayo qiimeynta saddexaad.

iii. Heerka Saddexaad: Imtixaanka Tartamayaasha

Taratamayaasha u soo gudba heerkan, waxay mari doonaan imtixaan isugu jira qoraal iyo wareysi si loo soo xulo liiska ugu danbeeyo ee 20ka jago, kaa soo loo gudbin doono Golaha Wasiirada, sida ku cad qodobka 58aad (7) ee DKMG ah ee Dawlad Goboleedka Hirshabeelle.

iv. Magacaabista Agaasimeyaasha Guud

Markii ay Golaha Wasiirrada ansixiyaan 20ka ku guuleystay qiimeynta, waxay magacyadooda iyo soo jeedinta magacaabiddooda u gudbinayaan Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Hirshabelle, si uu u magacaabo Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha.

**6. Xuquuqda Mushaarka**

Agaasimyaasha Guud, waxaa ay ka mid noqonayaan shaqaalaha ra'yidka ah ee dowladda Hirshabeelle; waxaana mushaaraadkooda bixin doona Dowladda Goboleedka Hirshabeelle.

## Shuruudaha laga rabo Agaasimaha Guud ee Dowladda Goboleedka Hirshabeelle

**1. Qeexid**

Agaasimaha Guud waa sargaalka ugu sarreeya maamulka waasaaradda, waana isku xiraha madaxda siyaasadda iyo howl-wadeennada Wasaaradda, si loo hir-geliyo qorshayaasha dowladda ay dooneyso in la qabto.

**2. Ujeeddooyinka shaqada iyo Mas'uuliyadda**

Mas'uuliyadda Agaasimaha Guud waa hoggaaminta maamulka iyo maareynta Wasaaradda, waana maamulaha howl-gallada maalinlaha ah, marka laga yimaado Wasiirka, waana qofka ugu sarreeya oo mas'uulka ka ah habsami u socodka howlaha wasaaradda, taas oo sal u ah dhammaan shuruudaha dowladnimo ee loo baahan yahay.

**3. Baaxadda shaqada**

Shaqada ugu muhiimsan ee Agaasimaha Guud waa maamulka iyo maareynta shaqaalaha, qorsheynta howlaha iyo fulinta qorshooyinka iyo istraatijiyadaha wasaaradda si waafaqsan sharciga iyo awoodda wasaaradda.

**4. Waajibaadka Shaqada**

I. Qorsheynta Istaratijiyadda

- Dejinta istaratiijiyadaha iyo nidaamka Wasaaradda;
- Dejinta qorshooyinka Wasaaradda ee muddada gaaban iyo midda dheer;
- Hubinta qaab dhismeedka Wasaaradda, iyo sidii loogu guuleysan lahaa loona gaari lahaa hadafka Wasaaradda.

II.Qorsheynta howlaha

- Dejinta qorshe si wanaagsan u shaqeynaya iyo hoggaamin wadarreed
- Soo-jeedinta iyo hirgelinta siyaasadda Wasaaradda, mashaariicda iyo howlaha u baahan in ahmiyad gaar ah la siiyo;
- Ilaalinta, dabagalka iyo ku dhaqanka heshiisyada khuseeya mashaariicda;
- Sameynta iyo haggidda qorshaha shaqada, shaqaalaha, mashaariicda iyo hirgelinta higsiga wasaaradda;
- Hubinta iyo kormeeridda qorshaha wasaaradda iyo warbixinta wax-qabadka wasaaradda iyo guud ahaan dowladda Hirshabeelle;
- Diyaarinta warbixin sannadeedka iyo warbixinnada kale ee loo baahdo;

III. Maamulka iyo Maareynta

- Talo-siinta wasiirka iyo ku-xigeenka si loo gaaro go'aanno cad oo ku dhisan xog iyo caddeymo waafi ah;
- Ilaalinta shuruucda shaqaalaha, hantida iyo maaliyadda Dawlad Goboleedka Hirshabeelle iyo la socodka howlaha waxqabad ee wasaarradda;
- Kormeerka shaqada iyo shaqaalaha;
- Xallinta xaaladaha taagan ee la xiriira howlaha wasaaradda;
- Hoggaaminta habsami-u-socodka howlaha wasaaradda, fududeynta jawi shaqo iyo dhiiri-gelinta shaqaalaha;
- Sameynta shir-guddoonka iyo guddoominta shirarka agaasimeyaasha waaxaha wasaaradda iyo shir guddoominta golayaasha lagu fuliyo/hago mashaariicda ay wasaaraddu hoggaamiso ama qayb ka tahay;
- Isticmaalka agabka iyo miisaaniyada wasaaradda si ku dhisan tashiil, waxqabad iyo saameyn munaasab ah;
- Abuurista dhaqan shaqo iyo waxqabad dhiirrigaliya daah-furnaan, kor-u-qaadis xirfad, waxtar iyo hoggaan hufan;
- Shaqaalaysiinta iyo xaqiijinta dad ku habboon shaqooyinka, si loo gaaro hadafka iyo hiigsiga wasaaradda;

IV. Shakhsiyadda qofka iyo waxbarashadiisa waa in uu:

- Haystaa shahaadada darajada koowaad ee jaamacad la aqoonsan yahay
- Leeyahay waaya aragnimo shaqo, ugu yaraan 5 sannadood
- Leeyahay ugu yaraan shan sano oo khibrad ah oo la xiriirta maamulka iyo maareynta

- Leeyahay xirfad hadalka iyo qoraalka oo heer sare ah, keeni kartana natiijo afka Soomaaliga oo uu ku gudbin karo qoraallo iyo hadal xambaarsan nuxurka ujeedada.

- Leeyahay sidoo kale xirfad hadalka iyo qoraalka midkood ama ka badan hal af ee afafka English, Arabic iyo French - darajo siyaado ah ayey u kordhinayaan

- Leeyahay shakhsiyad iyo dabeecad wanaagsan, lana dhaqmi karo qaybaha bulshada

- Leeyahay khibrad hoggaamineed

- Si wanaagsan ula socdaa waaqaca siyaasadeed iyo tan arrimaha bulshada ee Hirshabeelle iyo tan guud ee dalka Soomaaliya

- Leeyahay karti shaqo, una adkeysan karo cadaadis xagga shaqada ah iyo xaaladaha adag

- Leeyahay is-dirid iyo mas'uulnimo

- Leeyahay karti shaqo gudasho horjooge la'aan